Helitaanka Dukumentiyada iyo Adeegyada ee Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga jooga Sanca

Magangelyo-doonka iyo qaxootiga ka diiwaangashan Sanca hadda waxay ka cusbooneysiin karaan dukumeentiyadooda **Xafiiska Arrimaha Qaxootiga** ee Sanca. Haysashada dukumeenti cusub oo magangalyo-doon/qaxooti ah ayaa muhiim u ah ilaaladaada Yemen dhexdeeda, waxayna kuu fududaynaysaa **helitaanka adeegyada** ay bixiyaan UNHCR iyo masuuliyiinta qaranku

Adiga iyo qoyskaagu waa inaad sida ugu dhakhsaha badan ula xiriirtaan Xafiiska Arrimaha Qaxootiga si aad u cusboonaysiisaan dukumeentigiina magangalyo-doon ama qaxooti ee dhacay

Wixii ka dambeeya **15 Oktoobar 2023**, UNHCR ma siin doonto adeegyo shakhsiyaadka haysta dukumeenti dhacay. Shakhsiyaadka tagaya UNHCR ama la-hawlgalayaasheeda taariikhdan ka dib waxay u baahan doonaan inay marka hore ka cusboonaysiiyaan dukumeentiyadooda Xafiiska Arrimaha Qaxootiga, ka hor inta aan la caawin.

Xarunta Diiwaangelinta ee Xafiiska Arrimaha Qaxootiga,
Daaradda Hay'adda Socdaalka, Baasaboorada iyo Jinsiyadaha, Degmada Sabciin, Waddada Khawlaan, Magaalada Sanca, Yemen

Dukumeentiyada waxaa si joogto ah u cusbooneysiiya Xafiiska Arrimaha Qaxootiga. Dhammaan kaalmada iyo adeegyadu waa lacag la'aan.

UNHCR
The UN Refugee Agency

Si aad uga warbixiso anshax-xumada, fadlan la xidhiidh:
Khadka Ilaalada UNHCR: +967 71 222 5038
Iimeelka Ilaalada UNHCR: yemsaprt@unhcr.org
Xafiiska Kormeeraha Guud: inspector@unhcr.org